# Baro Sida SUN Bucks Ay U Caawin Karto Qoyskaaga!

SUN Bucks waa barnaamij faa'idooyiin raashin ah si uu caawiya qoysaska inay iibsadaan cunto inta lagu jiro xilliga xagaaga marka ay dugsiyadu xiran yihiin. Qoysaska waxay helaan $120 oo loogu talagalay ilmo kasta oo da'da dugsiga ah oo u qalma. Carruurta hela faa'idooyiinkan weli waxay ka qayb qaadan karaan barnaamijyada kale ee cuntooyinka xilliga xagaaga.

## Canugayga ma u qalmaa SUN Bucks?

Canugaaga wuxuu u qalmaa SUN Bucks haddii ugu yaraan mid ka mid ah shuruudaha soo socda la buuxiyo:

- Qoyskaaga horey ayuu uga qayb qaadanaya barnaamijka Kaalmada Ku Meelgaarka ah ee Qoysaska Danyarta ah (Temporary Assistance for Needy Families) ama SNAP (Supplemental Nutrition Assistance Program, Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah), canugaadana waa 8-18 sano jir.
- Canugaaga wuxuu dhigtaa dugsi bixiya Barnaamijka Qadada Dugsiga Qaranka (National School Lunch Program) ama Barnaamijka Quraacda Dugsiga (School Breakfast Program), dakhliga qoyskaagana wuxuu buuxiyaa shuruudaha cuntooyinka dugsiga ee bilaashka ah ama qiimaha jaban. Waxaad ka soo diri kartaa codsiga U-qalmitaanka Nafaqada Canuga iyo Faa'iidada Waxbarashada (Child Nutrition Eligibility and Education Benefit) dugsiga canugaaga si aad u ogaato in canugaaga u qalmo cunto bilaash ah ama qiimo jaban.

## Qoysasku sidee ayay u helaan faa'iidooyinka SUN Bucks?

Qoysaska badankooda ee u qalma uma baahna inay codsadaan sababtoo ah si toos ah ayaa loogu diiwaangeliye SUN Bucks. Qoysaskan waxay heli doonaan kaarka SUN Bucks boosta ahaan bisha Juun.

Haddii aan si toos ah laguugu diiwaangelin, weli waad codsan kartaa inta lagu jira xilliga xagaaga.

## Sideen u codsadaa SUN Bucks?

Booqo sunbucks.dshs.wa.gov si aad codsato si onlayn ah adigoo adeegsanaya Ingiriis. Waxaad sidoo kale sawiri kartaa QR koodhka si aad u hesho codsiyada SUN Bucks ee la turjumay oo aad u daabacato nuqul.

Ku dir codsiyada la dhamaystire:
DSHS Customer Service Center
P.O. Box 11669
Tacoma, WA 98411-6699

Marka aad codsanayso, waxaa lagu waydin doonaa inaad bixiso magaca canugaaga, dugsiga, taariikhda dhalashada, cinwaanka, iyo dakhliga qoyskaaga. Uma baahan doontid inaad bixiso dukumeentiyo kale ama macluumaad kale marka aad codsanayso. Waxaa laga yaabaa in lagaa rabo inaad bixiso macluumaad dheeraad ah ka hor inta aan faa'iidooyinka la bixin.

**Ma qabtaa su'aalo ku saabsan faa'iidooyiinkaaga SUN Bucks?**
**Ma u baahantahay inaad cusboonaysiiso cinwaankaaga?**

Ka wac Xarunta Xiriirka SUN Bucks lambarka 833-543-3230 ama TTY 800-833-6348

Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION